

Lasoo saaray Agoosto 24, 2009

Soomaaliya: Kala Bar Dadweynaha ayaa ku Sugan Xiisad Bani'aadanimo Iyadoo Dagaallada Sokeeye ka sii Xumaanayaan

Soomaaliya oo ay soo foodsaartey xiisad bani'aadanimimo tii ugu xumayd muddo 18 sano ah, iyadoo dagaalada sokeeye dalka ka dhaliyeen nidaam la'aanta sii xumeeysey Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ee dadka. Natiijoyinka ka soo baxay sahan ay wadajir u sameeyeen hey'ado iskudhaf ah, ee ay hogaamineysey Qeybta Falanqaynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ee Soomaaliya (FAO/FSNAU), ayaa xaqiijisay in xiisadda bani'aadanimimo ee Soomaaliya uu yahay mid baahsan oo halis ah, oo ay kala bar dadweynaha ama 3.76 malyan oo qof ay u baahanyihiin kaalmo bani'aadanimimo.

"Arritani waxay muujinaysaa inay ka sii dareyso xaaladda degdeg ah ee sugnaanta cuntada iyo nafaqada marka loo eego sanadkan horaantiisa", sidaas waxa tidhi Cindy Holleman oo ah madaxa Hay'ada FSNAU. 'Waxa uu wereer badani ka jiraa dagaalo ka socda meelaha xilligan loo arkay inay ku sugan yihiin xalad Cunto xumo iyo nafaqo darro'. Arritani culeys kuma ahaa oo keliya dadkii hore ugu jiray xisadaas, laakiin waxa kale oo ay dhibaato ku tahay sidii loo gaadhi lahaa bulshada u bahaan gargaarka degdeg ah si loo guto hawlo badbaadiya noloshooda. Dadka xaaladda adag ku jira boqoqiiba shan iyo todobaatan(75%) marka loo eego 3.76 Malyan ee dadweynaha soomaliyeed ee ku sugan xaaladda adag waxay ku suganyihiin koonfurta iyo badhtamaha dalka soomaaliya- halkaas oo ah meelaha dagaaladu ku xoogan yihiin isla markaana ay adag tahay si looga fuliyo Hawlaha gargaarka. Marka la eego xaladda nabadgelyo darro ee dagaalada sokeeye ee ka sii daraysaa, waxay FSNAU sameysaa digniino la xidhiidha xaaladda bani'aadannimo ee sii xumaanaysa, taasoo ku xidhan siday noqdaan dagaaladu todobaadyada iyo bilaha soo fool leh.

Qaybo badan oo dalka ka mid ah waxaa ka jira xaalad degdeg ah oo nafaqo daro kana soo darayey ilaa bishii 1aad halka heerka nafaqo daradu ay gaadhay in shantii cunug ee walba midkood qabo nafaqo darro xun, halka labaatankii cunugba midkood yahay heerka nafaqo-daro ba'an. Horaantii sannadkan heerka nafaqo darada waxay ahayd lixdii cunugba mid ka mid ah. Nafaqo darradan ba'an ee heerka Qaran ahi waxay ka mid tahay nafaqo xumo kuwa ugu halisaysan caalam ahaan. Dhawaan waxaa lagu qiyaasay in 285,000 oo cunug oo ay da'doodu ka yartahay shan sano oo Soomaaliya ku sugan inay la liitaan nafaqo-daro xun, kuwaasoo 70,000 ka mid ahi ay ku sugan yihiin nafaqo-daro ba'an oo ay qarka u saran yihiin dhimasho haddaysan dhakhsa u helin daryeel ku habboon. Carruurta marka seddex meelood laga dhigo, in ka badan laba meelood ahaan waxay ku nool yihiin gobolada Dhexe iyo koonfurta Soomaaliya.

Dadka hadda ku jira xiisadda bani'aadannimo, waxay ka koobanyihiin 1.4 malyan oo ah dadka reer miyiga aha ee ay saameysay abaar ba'ani, 655,000 oo ah dadka saboolka ah ee ku nool magaalooyinka, kuwaa soo si joogta ah ula halgama qiimaha sare ee cunnada iyo waxyaalaha kale ee aan cunnada ahayn ee lagama maarmaanka ah, iyo in ka badan 1.4 malyan oo qof oo ku barakacsan waddanka gudhiisa (DBG)oo ka cararaya dagaalada iyo iska hormiiaadyada (eeg khariiradda iyo shaxda ee dhinaca kale). Meelaha xuddunta u ah xiisadda bani'aadannimo waa gobollada Mudug, Galgaduud, Hiiraan iyo Bakool ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, halkaasoo laba iyo bar sano ay abaaro ka jireen. Xoolihii oo aad u dhamaaday iyo dadkii xoolo dhaqatada ahaa oo cayroobay oo kusoo qulqulaya tuulooyinka waawaayn iyo magaalooyinka ayagoo kaalmo doon ah. Mugga dhibaataada ee aaggaasi aad ayay u darantahay iyadoo 75% ee tirada guud ee dadweynaha ay ku sugan yihiin *Xaalad Gurmada Bani'aadannimo*.

Dadka ku barakacay dalka gudhiisa si aad ah ayey tiradoodu u siyaaday ilaa bishii Janaayo, laga soo bilaabo hal milyan haddanna inay ka badan yihiin 1.42 milyan oo qof, boqolkiiba 40% ayaa kordhay lix bilood gudahood. Inta badan dadkan barakacay waxay ka cararayaan colaad iyo qalalaase waxayna aad ugu badan yihiin gobollada dhexe iyo Shabeellooyinka. Sahar lagu ogaanayo heerka nafaqada dadkan barakacay wuxuu caddaynayaa in xaaladda nafaqadu halis ku sugan tahay, si joogto ahna u sareeyo heerka qiyaasta nafaqada ee GAM boqolkiiba 20% marka loo eego caruurta aan qaxootiga ahayn oo dhan 18%.

Waxaa kaloo jira in xaaladda sugnaanta cuntada iyo nafaqada ee xoolo dhaqatada iyo beero iyo xoolo dhaqatada ee waqooyiga dalka ay si ba'ani uga sii darayso, iyadoo sababeen abarta kasoo ifbaxday kadib markii 2-3 xilli oo isku xigta ay roobabkii xumaadeen. Aaggaasi waxay u dhibaateysanyihiin xilliyo isku xigxigay oo biyo yari ba'ani ay jirtay, dhibaato hayaan, xoolo badan oo ka baxay iyo iyagoo aad u daymaysan. Xaaladdu iminka way ka sii daraysaa, sida ay muujinayaan meelaha qaarkood heerka nafaqo darrida ee sii kordhaysa oo gaadhaysa heerka halbeega gurmada oo ah 15%. In lagu qiyaasay 255,000 oo ruux ayaa la ogaaday inay ku jiraan *Xaalad Cunno iyo Habnoleed Ba'an*, meesha 25,000 oo kale ay ku jiraan *Gurmada Bani'aadannimo*. Balse way ka duwanyihiin koonfurta iyo badhtamaha Soomaaliya, gobollada waqooyi oo hawlgalka bani'aadannimo ay wanaagsanyihiin, sidaas daraadeed, way adagtahay sidii goobahaasi ay u heli lahaayeen heerarkii ku haboonaa taageerada gurmada hab nololeedka iyo waxqabadka nafaqada, si looga hortago inay kasiid darto oo ay noqdaan *Gurmada Bani'aadannimo*.

Si aad u hesho xog dheeraad ah booqo website: www.fsnau.org ama la xidhiidh emailka: info@fsnau.org

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

**Arrimaha
Gobolka ee
Soo
Shaacbaxaya**

**Iskudhafka
Falanqaynta
Sugnaanta
Cunnada**

Cinwaanka:

FSNAU - Somalia

**United Nations Somalia,
Ngecha Road Campus
Box 1230, Village Market,
Nairobi, Kenya
Tel: +254-20-4000500
Cell: +254-722-202146 /
733-616881
Fax: +254-20-4000555
Email: info@fsnau.org
Website: www.fsnau.org**



Technical &
Managerial Support



European
Commission




USAID



Funding Agencies



KHARIIDADDA QOONDAYNTA XAALADAHAA EE ISKU XIRAN EE SOOMAALIYA, Saadaasha dadka deggan dhulka miyiga ah, magaalooyinka iyo dadka gudaha ku barokacsan, bisha 7aad-bisha 12aad ee 2009



Tiro la isku daray oo ah dadka deggan miyiga, magaalooyinka iyo dadka soo barakacay ee Soomaaliya , bishii 7aad-12aad ee 2009

Gobolka	Isku Darka Tirada Dadka ee UNDP 2005	Isku Darka Tirada Dadka ee UNDP 2005	Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee UNDP 2005 1	Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)	Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) ee Haysata Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah 2	Dadka Magaalooyinka ee ku jira Gurmada Bina-aadamnimo (GB)2	Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee ku jira Gurmada Bina-aadamnimo (GB)2	Isku Darka Dadka iyo GB oo ah % Tirada Guud ee Dadweynaha
Waqooyi								
Awdal	305,455	110,942	194,513	5,000	25,000	0	0	10
Woqooyi Galbeed	700,345	490,432	209,913	55,000	30,000	0	0	12
Togdheer	402,295	123,402	278,893	55,000	75,000	20,000	5,000	39
Sanaag	270,367	56,079	214,288	20,000	75,000	5,000	15,000	43
Sool	150,277	39,134	111,143	15,000	35,000	5,000	0	37
Bari	367,638	179,633	202,737	80,000	0	25,000	0	29
Nugaal	145,341	54,749	75,860	25,000	15,000	0	5,000	31
Isku darka	2,341,718	1,054,371	1,287,347	255,000	255,000	55,000	25,000	25
Gobollada Dhexe								
Mudug	350,099	94,405	255,694	30,000	40,000	0	110,000	51
Galgaduud	330,057	58,977	271,080	15,000	35,000	10,000	200,000	79
Isku darka	680,156	153,382	526,774	45,000	75,000	10,000	310,000	65
Koonfur								
Hiraan	329,811	69,113	260,698	25,000	35,000	5,000	160,000	68
ShabelleDhexe	514,901	95,831	419,070	25,000	60,000	0	160,000	48
ShabelleHoose	850,651	172,714	677,937	35,000	50,000	10,000	5,000	12
Bakool	310,627	61,438	249,189	25,000	65,000	0	70,000	52
Baay	620,562	126,813	493,749	20,000	5,000	0	5,000	5
Gedo	328,378	81,302	247,076	30,000	80,000	0	40,000	46
Jubbada Dhexe	238,877	54,739	184,138	10,000	5,000	0	0	6
Jubbada Hoose	385,790	124,682	261,108	20,000	10,000	0	0	8
Isku darka	3,579,597	786,632	2,792,965	190,000	310,000	15,000	440,000	27
Banaadir	901,183	901,183	-	30,000	-	55,000	-	9
Isku Darka Guud	7,502,654	2,895,568	4,607,086	520,000	640,000	135,000	775,000	28

Tirada dadka la qiimeeyey iyo kuwa ay suurtagal tahay inay galay XCHAX & GB	Tirada saamoobay	% ee Isku darka guud ee dadweynaha	Qaybinta dadweynaha ku jira xiisad
Dadka Magaalooyinka ee La Qiimeeyey ee ku jira XCHAX & GB	655,000	9	17%
Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee la Qiimeeyey ee ku jira XCHAX & GB	1,415,000	19	38%
Qiyaasta tirada dadka cusub ee soo barokacay oo la cusboonaysiiyey 2dii bishii 8aad	1,420,000	19	38%
Qiyaasta tirada dadka muddada dheer barakacsanaa	275,000	4	7%
Qiyaasta dadka deggan dhulka miyiga ah, magaalooyinka & dadka barokacsan ee ku jira xiisad	3,765,000	50	100.0%